Xeerka Wasiirka Isgaarsiinta iyo Gaadiidka lamba. 183 ee 2 Setember 1967

Fassaxida 90 shanle ee kallumeysiga weyn ee Shirkadda "PRO.D.MA. Ltd"

WASIIRKA

Kadib markii la arkay qod. 83 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay qodobka 66 ee Xeer- sharci lamba. 1 ee 21 Febarayo 1959 oo lagu ansixiyey Xeerka Badda;

Kadib markii la arkay qod. 2 ee DPR lamba. 7 ee 1 Nofember 1966 oo loo beddeley sharci lamba. 3 ee 7 Jannayo 1967

Kadib markii la arkay arjiga Shirkadda "PRO.D.MA. Ltd" ay ku soo codsatay fassaxa oggolanshada kallumeysiga muddada u dhexeysa Ras Kiambooni ilaa Ras Cawdulla (markii laga reebo Degmada Kismaayo);

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Ilaa iyo muddo 9 sano ah, laga bilaabo hirgelinta Sharcigaan waxaa loo oggoaladay Shirkadda PRO.D.MA., oo saldhigeedu ahay Muqdisho, fassaxain ka kallumeysto aaga badda ee u dhexeyo Ras Kiamboni iyo Ras Caudulla (Kismaayo), isticmaalka dhulalka dimaniyaalaha ee lagu qoray shaxda lagu aqbalayoo ka mid ah qeyb ka mid ah Dekreetadan.

Qod. 2

Dekreetadan waxay hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 2 Setember 1967.

Wasiirka Isgaarsiinta iyo Gaadiidka
Hared Farah Nur

Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga
Mohamed Ali Daar

La arkay la diiwan geliyey-diwaan lamba. 1 bogga lamba. 117

Muqdisho, 7 Oktobar 1967.

Xisaabiyha Guud

Mohamed Ahmed Abdilleh

NIDAAMINTA RUQSADA KALLUMEYSIGA WEYN

Sanadku markuu yahay 1967, maalinta 2 ee bisha Setember, magalaada Muqdisho, Xafiisyada Wasaarada Isgaarsinta iyo Gaadidka.

H O R D H A C

Arjiga ku taariikhsan 1 Agoosto 1967 oo ay Shirkadda PRO.D.MA. SpA (Shirkadda wax soo saarka badda) oo saldhigga sharci kuleh Muqdisho, waxay ku codsatay fassax kallumeysi guu aaga ku dhexeeya Ras Kiamboni iyo Ras Audulla (Ras Audulla waa ka reeban yahay) iyo hibeynta dhul demanial ah oo loo bahday in laga dhisayo dhismooyinka lagu keydiyo, lagu qaboojiyo, loogaga shaqeeyo malaayga, la dhigo qalabka iyo aaladadaha kallumeysiga iyo guryaha shaqaala ee aaga Kismaayo.

Dowladdu waxay go'aamisay in la aqbalo arjiga Shirkadda.
Iyadoo la tixgeliyey sida ku cad qod. 68 ee Xeerka Badda, marxaladaha iyo shuruudaha oggolanshahaan waxaa lagu qori doono nidaamintaan oo uu saxiixay Mudane Hared Farah Nur, Wasiirka Isgaarsiinta iyo Gaadidka, dhinaca Dowladda Somaliya iyo Dr. Omar Mocallin, Maamulaha la wakiishay ee PRO.D.MA Ltd ee dhinaca Shirkadda.

Qod. 1

Dowladda Somaliya haddii intii ka dambaysana loogu yeeri "Dowladda" waxay u oggolatay Shirkada PRO.D.MA oo loogu yeeri doonon"Shirkadda" fassax in ay ka kulleymaysasto inta u dhexeysa Ras Kiamboni iyo Ras Audulla (Ras Audulla waa ka reeban yahay) muddo 9 sano ah.

Oggolanshadaani waxay u fassaxday Shirkadda in ay ka howl gasho kallumeysi iyo howl kasto oo la xiriirta sida ka howlgalka waxaa laga soo saaray badda, keydinta iyo dib uga shaqeeynta wax yaalaha looga baahan yahay warshadeynta.

Si looga hirgeliyo ama looga howl galo ama loo dhiso dhismooyinka iyo qalabka loo baahan yahay waxaa la siiyey Shirkadda, degganka iyo isticmaalka 90 sano ka bilaabato maalintii la aqbali Xeer niddaminta ah dhulka demaniyaale ah oo sidaan u xadeysan.

Waqooyi 2 silos ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Konfurta. Badweynta Hindiya, Galbeed: jidka Jasiirada Masaska, Bari. Dekedda Kismaayo, dhulkaasi oo leh qaab geesasleh kuna fadhiya dhul dhan 10.000 sqm.

Qod. 2

Muddada 90 sano waxay ee oggolanshahaan ka bilaaban doonta tariikhda lagu carifo dekreetadaan oo lagu aqbaly nidaamiyahaan.

Qod. 3

Dhulka la lbixiyey waxaa lagu qaadanaya sida uu hadda ku suggan yahay, waxaana fulinta howlaha loo baahdo dib- u – habeentiisa sida fallidda, bulaaceynta, dhismooyinka iwm u xil saaran Shirkadda.

Qod. 4

Bixinta oggolanshaa 90ka sano waa mid la cusboneysiin karo - markii ay Dowladdu ku qanacdo-iyadoo la filaayo in Shirkaddu ay hal sano ka hor dhicidda muddada ay arji cusboneysin ah keento.

Qod. 5

Iyadoo la cuskanaayo qod. 68 ee Xeerka Badda, oggolashahu ma siin doono Shirkadda awood in ay keligood u go'naato awooda kallumeysiga ee aagasi, gaar ahaan kallumeysiga kallun qolofleh taas oo ka reebeynin in cid kale la siiyo oggolaanshahaan oo kale.

Qod. 6

Oggolanshada fassax kallumeysiga waxaa dib loola noqon kara haddii ay caddato in shirkaddu ka gaabsatay wajiibaadkii saarnay.

Qod. 7

Oggolanshaha fassaxaan waxaa lagula noqon kara Xeer la asbaabeyey markii danaha badda iyo asbaab ammanka dadweynaha ay sababaan. Haddii ay taasi dhacdo, Shirkaddu waxay xaq u yeelaan doonta magdhaw lagu qaxiyi doono sida ku qoran qod. 17.

Qod. 8

Oggolanshaha fassaxaan waxaa lagala noqon karaa Xeer ay Dowladdu sababeyn doonto haddii Shirkaddu 2 sano kadib aanan la fulin arrimaha horumarinta markii dekreetadan lagu daabacay sida ku cad qod. 2:

a) buundo doomaha lagu soo xiro;
b) Dhismooyinka muhim ah oo ka kooban garaash weyn oo qol waasac ee lagu jarjaro kallunka, keydka qabooyeyaalka oo ku dheggen, xafiisyada iyo goobta qalabka lagu hagaajiyo;
c) Dhismo qaabooije ah oo markiiba qaboojin kara ilaa 5 kintaal maalintiiba
d) Qeyb tamarta oo ka kooban 1 koronto dhaliye ee Diesel ee 150 Kw iyo shaqaalihi ka shaqeyn laha;
e) Qeybta kululeysatada ah;
f) Keydka biyaha, shidaalka iyo dhismaha qeybintooda;
g) Qalabka kallumeysiga iyo shaqaalahooda;
h) Qalabka kala duwan, qalabka isgaarsinta, aaladaha, qalab sbaare bartiska ah iyo shaqaalahooda.

Waxaa loogu tala galay in guud ahaan ku baxdo kharaj dhan Sh. So. 3,150.000.

Qod. 9

Shirkaddu waa in ay howlaha kallumeysiga u isticmaala qalabka u qalmo;

Shirkaddu waxay howlaheeda u gudan doonta iyadoo isticmaali doonta qalabkeeda iyo shaqaalaheedasida ku cad qod.10, waxayna ka gadan doonta kallumeysatada deeganka kallunka ay soo jillaabeen iyagoo sicir mac'quul ah oo ay raali ka noqdaan hey'adaha deggaanka ah.

Qod. 10

Qorista, mushaarsiinta iyo caymiska shaqaalaha, shirkaddu waxay u hoggansanaan doonta Xeerka Shaqaalaha, Xeerka Badda iyo shuruucda kale ee dalka ka jira.

Qod. 11

Waxaa ka reeban in aaga badda loo qoondeeyey in laga kallumeysto noocyada malayga ee fregolo iyo malayga novella ama kuwa kale oo aan dhibaato dhalineynin haddii aysan gaarin heer in lagu kala yaareyo kadib markii la soo saaro xeerar kale. Waxaa kale oo rreban aruurinta iyo beec geynta xoolaha la suuxiyey ama sidaas lagu dilay.

Qod. 12

Shirkaddu waxay howlaheedu ku koobnaan doonaan xadka dhulka loo qondeeyey sida ku cad qod, 1, iyadoo markii ay dhismaha iyo baqaaraddu lagu dhowri doono xeerarka faayo dhowra iyo caafimadka.

Qod. 13

Shirkaddu waxay u xilsaaran tahay in ay dhaqaale geliso gacan ku haynta dhismooyinka, baqaaradd iyo qalabka oo dhex yaala dhulka demaniyaala ee la siiyey. Waxaa kale oo xil ka saaran yahay in ay horumariso mashaaric iyo hey'adaha hirgelinayaa kordhinta aqoonta teknikada , dhaqan-dhaqaale ee ummadda ku nool Degmada Kismaayo.

Qod. 14

Waxaa Shirkadda ku waajibay si ay u fuliso nidaamiyaha in ay siiyo 1da Janaayo ee sanad kasta lacagta dhan Sh.So. 2.000 oo ah deggenashaha iyo isticmaalka dhulka lagu carifay qod.1 iyo Sh.So. 4,000 oo isagana sanadleh ah.

Qod. 15

Waxaa Shirkadda lagu waajibiyey in ay bixiso lacag dammanad ah oo dhan Sh.So. 5,000 30 beri kadib markii nidaamiyahaan lagu soo faafiyo Xeer ahaan.

Haddii iyadoo la dhowrayo nidaamiyahaan ay Shirkaddu ka gaabiso wajiibadka, Dowladdu ay ku dhawaaqdo in oggolaanshu dhacay gudasho howlaha loo igmaday, Dowladdu xaq ay u yeelan doontaa in la wareegto lacagtaasi.

Qod. 16

Shirkaddu waa in ay u fassaxda dhismaheeda iyo qalabkeeda kallumeysig, saraakiisha iyo wakiiladaha Furdada ama ciddii kale ee Dowladdu soo dirsato arrimo la xiriira howlahooda.

Shirkaddu waa in ay u hoggasnsanata amaaradda Booliska sida naleynta goobaha, ha hortagga debka iyo dhowrista habka badda iyo maraakiibta ka goosheysa.

Qod. 17

Haddii oggolanshada fassaxa lagala noqdo si waafaqsan qod. 7 iyo 8 ee nidaamiyahaan, dhismaha laga taagay dhulka la siiyey sida waadiyada, vivai, bundada doomaha, jidadka waxaa la wareegi doono Dowladda iyado wax magdhaw ah loo celin Shirkadda

Shirkaddu waxay yeelan doonta qalabka loogu tala galay diyaarinta iyo ka shaqeynta waxyaalaha badda laga helo iyo wixii laga soo saaro iyaga, qalab

dada, shabaqyada, haddii aysan Dowladdu loo oggolan in ay ka iibsato. Waxay Dowladdu codsan karta in dib loo soo celiyo dhulkaas sidii uu ahaa waqtigii la bixiyey. Amarradani qodobkaan ku tilmaama waxaa kale oo ay hirgeli karaan haddii ay Shirkaddu ka noqoto ama ay caddeyso in ay qasaartay.

Qod. 18

Haddii oggolanshaani dib loola noqdo sida waafaqsan qod. 6 ee nidaamiyahaan, Shirkaddu waxay yeelan doonta magdhaw tixgelin doono kharaj la galay, muddada Shirkaddu ay ka faa'ideysatay iyo wixii kale oo ay qiimo ahaan isticmaali doonto.

Si kastaba, qiimaha kor uma dhaafi karo qiimaha dhismaha taaqan oo laga reebay wixii deyn. Magdhaw sare lagu sheegay waxaa xadiidi doono Dowladda. Haddii ay Shirkaddu dacwo ka qabto habka qiimeynta magdhaw waxay dacwo u diri doonta Guddiga Dhexdhexaadinta oo leh go'an aan racfaan leheen.

Gar-qaadayaasha Guddigasi waxaa hal magacaabi doono Dowladda, mid kalena Shirkadda, midka 3aad oo Hoggamin doono waxaa magacaabi doono labada Gar-qaadayaal, haddii ay ku heshiin waayan waxaa magacaabi doono hey'adda garsoorka ee qaabilsan. Guddigaasi saldhigiisu waa Muqdisho.

Qod. 19

Dib ula noqoshada oggolanshaha ee lagu xusay qod. 17 iyo qod. 18 waxaa lagu qori doonaa Xeer la asbaabeyey ee Wasiirka Isgarsiinta iyo Gaadiidka, iyadoo Shirkaddana laga suggaya in muddo 30 beri gudahooda ay warcelis keentaa.

Qod. 20

30ka bisha Juun ee sanad kasta, Shirkadda waxaa laga suggaya in ay soo gudbiso warbixin qoraal ah ee natiijada laga gaaray howlaha kallumeysiga, kuwa la barafey iyo wixii ka soo baxay.

Qod. 21

Haddii la rabo in la wareejiyo hantida shirkadda shirkaddo kale waxaa marka hore qassab ah in la helo oggolanshada Dowladda.

Qod. 22

Shirkaddu waxay ku qasban tahay in ay u hoggansanato shuruuc iyo xeerarka kale ee dalka ka jira iyo wixii amarro ee la xiriira howlaheeda, haddii aysan hor istageenin amarrada ku qoran nidaamiyahaan.

Qod. 23

Kormeeridda howlaha kallumeysiga, keydiinta, howlaha la xiriira diyaarinta iyo hubinta iyo ka hortagga in la jebiyo xeerarka sharciga oo lagu maamulo arrimahaan waxa fulin doono hey'adaha dowlada iyadoo la dhowri doono sharcig dalaka ku degsan.

Qod. 24

Haddii ay jirto in lagu xadgudbay xeerarka ku qoran qodobada heshiiskaan ee dhinaca Shirkadda, Wasiirka Isgaarsinta iyo Gaadiidka wuxuu si idaari ah iyadoo la fulinaaya amarrada qod. 15 wuxuu la wareegi doonaa guud ahaan ama barka lacagta damaanadda ah.

Waxaa lagu fulin doonaxeer la asbaabey oorafcaan lagaga qaadan doono Maxkamadda Sare.

Shirkaddu waxaa laga rabaa in soo celiso muddo 3 bilood gudahooda laga bilaabo maalinta fulinta xukunka.

Qod. 25

Wixii muran ee ka dhex dhasho Dowladda iyo Shirkadda ee la xiriira oggolanshada fassaxaan, ha ahaato muddado ay socoto heshiiskaan, haddii aanan lagu dhameeynin hab idari ah waxaa loo gudbin doonaa Guddiga Gar-qaadista oo lagu dhiso sida ku qoran qod. 17.

Qod. 26

Kharaj iyo canshuuradka qoralkaan waxaa bixin doono Shirkadda.

Qod. 27

Waxaa lagu dabaqi doono oggolanshada fassaxaan amarrada sharciga iyo xeerarka ka hirgalo Somaliya, ama la soo saari doono kadib, kadib markii laga reebo kuwa ku adag nidaamiyaahan.

Waxaa la qoray, la aqriyey lana saxiixay.

Wakiil Dowladda
Hared Farah Nur

Shirkadda
Omar Mocallim

Qoraal
Ali Said Arrale Francesco Franceschi